

Macluumaad muhiim ah oo ku saabsan jadeecada

Macluumaadka waxaa bixiyay waaxda caafimaadka ee degaanka Multnomah, Clackamas iyo Washington.

Dillaaca jadeecada ee hadda ka jira Degaanka Clark, Washington, ayaa keenaya su'aalo ku saabsan waxa ay waalidiintii tahay in ay ogaadaan sida ay carruurtooda uga dhigayaan kuwo badbaado leh, iyo waxa dugsigoodu samayn doono haddii kiis jadeeco ah la xaqiijiyo in uu ka jiro goobtooda.

Halkan waxaa ku qoran macluumaad muhiim ah oo ay tahay in maskaxda lagu hayo:

Jadeecadu waa mid aadka la isku qaadsiiyo. Haddii kiis la xaqiijiyo in uu ka jiro dugsiga ama xarunta xannaanada carruurta, waaxda caafimaadku ayaa dib u eegi doonta dhammaan diiwaannada tallaalka ee shaqaalaha iyo dugsiga si loo go'aamiyo halista sii faafidda.

Ilaalinta carruurta ku jirta dugsiga/xannaanada carruurta waa mid mudnaan leh, laakiin jadeecadu waa cudur halis ah. **Haddii qof aan tallaalnayn ay soo gaarto jadeeco, looma oggolaan doono in uu aado dugsiga ama xannaanada carruurta inta lagu jiro wakhtiga ay jiran karaan, oo sida caadiga ah 21 maalmood ka dib soo gaarista.** Tani waa la kordhin karaa haddii ay jiraan kiisas dheeraad oo jadeeco ah.

Dadka laga reebay dugsiga ama xannaanada carruurta ka dib soo gaarista jadeecada waxaa laga codsadaa in ay guriga joogaan si looga ilaaliyo in gaarsiiyaan dadka kale ee bulshada ka tirsan.

Hadda waa waqti wanaagsan oo loogu talagalay qoysaska, macallimiinta iyo maamulayaashu dugsigu in ay dib u eegaan diiwaannadooda tallaalka isla markaana tallaaladooda uga dhigaan kuwo cusub.

Qof kasta oo qaba su'aalo ku saabsan infekshanka jadeecada ama tallaalka jadeecada waa in uu wacaa daryeel bixiyihiisa aasaasiga ama waaxda caafimaadka ee degaankiisa:

- Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka Multnomah, 503-988-3406
- Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka Washington, 503-846-3594
- Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka Clackamas, 503-644-8411

Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah, booqo [website-ka](#) Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah.

Si Daacadnimo leh,
Jennifer Vines, MD, MPH
Ku xigeenka Sarkaal Caafimaadka u Qaabilsan
Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah